Human Resources and Skills Development Canada | Ressources humaines et Développement des compétences Canada

Haatan iyo Berritaba

Wax Kasta oo Aan Qabano oo Wanaagga Ugu Sarreysa Leh

Qorshaha Ukeydiska Waxbarashada Diiwaangasha
U QORSHEE UKEYDINTA WAXBARASHADA ILMAHAAGA

CANLEARN.CA/ CIBLETUDES.CA

Canada

RESP

Ma ka fikiri kartaa ilmahaaga oo sii wata tacliintiisa waxa ka dambeeya dugsiga sare.
Dowladda Kanada ayaa kaa caawin karta inaad ugu keydsato mustaqbalka ilmahaaga Qorshaha Ukeydiska Waxbarashada Diiwaangashan (RESP).

WAA MAXAY RESP?

Qorshaha RESP waa koonto ukeydsi waxbarasho laga diiwaangaliyo dowladda Kanada.
Waxay idinka caawineysaa adiga, qoyskaaga ama asxaabtiinu inay lacag ugu dhigtaan waxbarashada ilmahaaga waxa ka dambeeya dugsiga sare.

Waxaad ka furan kartaa RESP hay'ad lacageed, oo ay ka midka yihiin bangi ama bangiga iskaashatada, ama iyada oo loo maro qorsheeye lacageed sharciyeysan ama ganacsade qorshe kooxeed. Hay'adahan, qorsheeyeyaashan iyo ganacsatadan ayaa loo yaqaan "bixiyeyaasha RESP."

SABABTU MAXAY TAHAY AAN UGU KEYDINAYO WAXBARASHADA ILMAHAYGA?

Waa faa'iido in la keydsadaa! Qorshaha RESP, ayaa kaga caawin kartaa rajada ilmahaagu inay isku beddesho dhab. Keydsiga kaliya hal doolar maalintii ayaa wax ku ool leh.

Waxa inta u dheer wax ku biirintaada RESP, inaad adigu hesho:

• Bondka Waxbarashada Kanada; iyo/ama

• Deeqda Ukeydsiga Waxbarashada Kanada.

WAA MAXAY BONDKA WAXBARASHADA KANADA?

Bondka Waxbarashada Kanada ayaa ah **$500** oo ay bixiso Dowladda Kanada sidii ay adiga kaaga caawin lahayd bilaabitaanka u-keydinta loogu talagalay waxbarashada ilmahaaga waxa ka dambeeya dugsiga sare. Intaa waxa u dheer, ilmahaaga oo heli kara $100 sannad kasta illaa isagu ama iyadu ay noqoneyso 15 jir lacagtuna ugu badanaan noqoneyso **$2,000**!

Ilmahaaga ayaa uqalma
Bondka Waxbarashada Kanada haddii :

• isagu ama iyadu dhasheen wixii ka dambeeyay Disember 31, 2003; iyo

• adigu aad hesho Anfac Kaabka Ilmaha ee Qaranka ee hoos yimaad Anfaca Cashuurta Kanada ee Ilmaha (waliba loo yaqaan gunnada qoyska).

WAA MAXAY DEEQDA UKEYDSIGA WAXBARASHADA KANADA?

Waa lacag ay dowladda Kanada kuugu dari doonto ukeydiintaada Qorshe RESP. Deeqdan ayaa leh laba qaybood:

1. Deeqda Ukeydsiga Waxbarashada Kanada

Iyada oo aan loo eegin inta lacag ah ee qoyskaagu sameeyo, Deeqda Ukeydsiga Waxbarashada Kanada ee Aasaasiga ah ayaa ku siin doonta 20% doolarkii kasta ee ah $2,500 ugu horreysa ee aad u keydiso Qorshaha RESP-ga ilmahaaga sannad kasta.

Tan micnaheedu waa $10 kasta oo aad ku keydiso Qorshaha RESP ee ilmahaaga, Dowladda ayaa ku dari doonta $2 doolar.

2. Deeqda Ukeydsiga Waxbarashada Kanada oo Dheeraad ah

Iyada oo ku xiran dakhliga saafiga ah ee qoyska, adigu waxaad heli kartaa 10% ama 20% dheeraad ku ah doolar kasta oo $500 ee ugu horreysa ee aad ugu keydiso qorshaha RESP ilmahaaga sannad kasta.

Tan micnaheedu waa $10 kasta oo aad ku keydiso Qorshaha RESP ee ilmahaaga , Dowladda ayaa ku dari doonta $1 ama $2 dheeraad ah.

Hubso inaad codsato labada qaybood ee deeqdan.

Bondka Waxbarashada Kanada iyo Deeqda Ukeydsiga Waxbarashada Kanada ayaa kaliya loogu keydin karaa koonto Qorshe RESP.

XULASHADA RESP-GA KUUGU HABBOON ADIGA

Waxa jira saddex nooc oo Qorshayaasha RESP ah:

• **Qorshayaasha RESP ee Qoyska:** Waxaad lacag gaar ugu dhigi kartaa hal ama in ka badan oo carruur ah oo adigu aad dhashay ama waxa aad isku tiihn ama u korsato si sharci ah. Waxaad ugu keydin karta dhammaantood adiga oo istcimaala hal qorshe RESP.

• **Qorshayaasha RESP ee Shaqsiga:** Waxaad ugu keydin kartaa hal cunug, haddii aad wax isku tihiin adiga ama aydaan wax isku ahaynba.

• **Qorshayaasha RESP ee Kooxda:** Lacag keydintaada oo lagu daro kuwa dadka kale iyo waxyaabaha laga kasbado ayaa la wadaagi doonaa markay tahay wakhtigeedi lagu bixin lahaa dugsiga. Biximaha caadiga ah ee ah dhammaanteed muddada waxbarashada ee qorshaha RESP ayaa sida caadiga ah loo baahan yahay, laakiin qorshe kasta ayaa leh xeerarkeeda.

Waa muhiim inaad ka baaraandegto oo wakhti siiso kahor intaadan xulan qorshaha RESP oo si taxaddar leh aad u akhrisatana qandaraaska kahor intaadan saxeexin.

Ka wareyso bixiyaha Qorshahaaga RESP arrimaha ku saabsan:

• xulashada maalgashigaaga (koontada keydsiga, bondka, waraaqaha rasmiga ah ee maalgashiga dammaanadda leh (GICs), maalgashiga wadajirka ah ama saamiyaasha);

• arrimaha faa'iidooyinka iyo halista ay leeyihiin xulasho kasta, sababta oo ah maalgashiyada qaarkood oo halistoodu ka badan tahay kuwa kale;

• ajuurada maamulka; iyo

• ganaaxyada la iska qaadi karo haddii si joogto aad u bixin weydo biximaha ama haddii aad xirto Qorshaha RESP.

SIDEEN KU FURTAA QORSHAHA RESP OO AAN KU HELAA DEEQYADA DOWLADDA KANADA?

Tallaabada 1–U hel **Lambarka Ceymiska Bulshada (SIN)** ee loogu talagalay ilmahaaga. Waa bilaash.
U wac 1 800 O-Canada (1-800-622-6232) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah ama booqo Xarunta Adeegga Kanada ee kuugu dhow.

Tallaabada 2– La xiriir bixiye Qorshaha RESP ee aad xulato si aad u furato Qorshe RESP.

Xulo Qorshaha RESP iyo bixiyaha Qorshaha RESP ee adiga sida ugu wanaagsan kuugu habboon oo weydii:

• haddii ay bixiyaan **Bondka Waxbarashada Kanada** iyo **Deeqda Ukeydsiga Waxbarashada Kanada oo Dheeraad ah;**

• Noocyada Qorshayaasha RESP ee ay bixiyaan (qoyska, shakqsiga ama kooxda) iyo arrimaha faa'iidooyinka iyo halista ay leeyihiin midkood kasta;

• maxaa waxyaabo maalgashi ee ay fidiyaan iyo arrimaha faa'iidooyinka iyo halista ay leeyihiin midkood kasta; iyo

• waxay yihiin ajuurada maamulka iyo ganaaxyadoodu.

Booqo CanLearn.ca si aad u hesho liiska su'aalaha waajibka ah inaad weydiiso bixiyaha Qorshaha RESP.

Tallaabada 3– Furo Qorshe RESP oo buuxi foomka Aasaasiga ah ee Deeqda Ukeydsiga Waxbarashada Kanada oo Dheeraad ah iyo foomka codsiga Bondka Waxbarashada Kanada iyada oo u kaa caawiyo bixiyahaaga qorshe RESP.

XAGGEE AYAAN CAAWIMO AMA MACLUUMAAD DHEERAAD AH KA HELI KARAA?

1 800 O-Canada (1-800-622-6232)

TTY: 1-800-926-9105

Booqo www.CanLearn.ca

Tag Xarunta Adeegga Kanada ee kuugu dhow